



Barnaamijka Wakiilnimada ee Maamulida Riinjiga Guriga aan La isticmaalin

Sannad kasta ugu dhawaan 780 milyan oo galoon (2.95 bilyan oo litir) oo rinjiga nashqadeed ah ayaa lagu iibiyaa Maraykanka. Ma og tahay in boqolkiiba 10 aan la isticmaalin oo dib-u-cusboonaysiinta loo isticmaalo?

Sharciga gobolka ee Xilka Hawlaha Rinjiga wuxu farayaa in wershada sameeya rinjigu ay kobciyaan barnaamij maaliyadeed oo istaraya oo dabeecad ahaan xil ka saran yahay barnaamijka maaraynta rinjiga naqshadaynta macmiilka kaddib.

Barnaamijka waxa ku jira waxbaris laxiriirta iibsashada qaddarka rinji ee habboon, tallooyinka isticmaalka inta ka harta rinjiga iyo dejinta goobo dib-u-wershadayn daafaha gobolka oo dhan.

Sameeyayaasha rinjiga waxay samaysteen Paintcare, urur samofala, si uu wado barnaamijyada mas'uuliyadeed, gobolada leh sharciyo ku dhaqan ah.

Badeecadaha PaintCare

Waxsoosaaradan waxay leeyihiin khidmado marka aadiibsanayso waxaana la aqbalaa bilaash goobaha lagu rogayo:

- Rinjiyada nashqadeed ee gudaha iyo dibadda: rinjiga biyaha leh, akrilik, biyo leh, alkayd, saliid leh, enamel (oo ay kujiraan dahaadhada qallafsan)
- Dahaadhada dhakada, ranjiyada sagxadda (oo uu kujiro elastometric)
- Buugaagta tilmaanta ah, siilariska, hoos-da haadhyada
- Aastaamaha rinjiga
- Sheelaakis, aslayaasha, xabagta looxa, yureteynis (hal kujire)
- Shubka biyuhu aanay galin/masanariga/xidhiyaasha qoryaha iyo waxyaalaha rebellantiska ah (maya mid uu kujiro daamur)
- Dahaadhada birta, kahortaggayaasha daxalka
- Rinjiga goobta iyo daaqa

Dusmada, weelka aan calaamadaysnayn oo madhan lama aqbalayo meelaha lagu dejiyo.

⊘ Badeecadaha Aan-ahayn PaintCare

- Qafiifiyaha riinjiga, isbiiriyada macdanta, dareerayaasha
- Ranjiyada buufinta
- Ranjiyada baabuurta iyo gaadiidka badda
- Ranjiyada farshaxanka iyo qurxinta
- Kawl, iboksis, xabagta, iyo ku dhagayaasha
- Wanaajiyayaasha ranjiga, midabeeyayaasha, midabyo kala duwan, xabagaha
- Xafidayaasha qoryaha (ay kujiraan cayayaan dile)
- Qaybta saqafka iyo dayactirka
- Asfaalt, waxsoosaarka daamurku kujiro
- Dahaadh 2 shay ka kooban
- Nadiifiyaasha dhakada
- Ranjiyada gaadiidka iyo calaamadinta waddooyinka
- Dahaadhada Dayactirka Warshadeed
- Soosaaraha Qalabka Asalka (OEM) (dalabka tukaanka) ranjiyada iyo qurnxinta

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan qashin qubka iyo tuuris ku haboon ee waxyaabaha aan PaintCare aheyn, fadlan la soo xiriiir gaadiidka qashinka, hay'ada caafimaadka deegaanka, barnaamijka halisaha qoyska ama waaxda shaqooyinka bulshada.



Dib-u-warshadaynta PaintCare



Meelaha la Geeyo Rinjiga Duugga ah

Dib-u-isticmaalka rinjiga aad ayuu u habboon yahay PaintCare. Waxaa sameynay goobo lagu dajiyo rinjiga oo illaa gobolada leh sharciyada wakiilnimada. Si aad u hesho goobaha dejinta ee kuugu dhaw, isticmaal qalabka barista PaintCare www.paintcare.org ama wac khadka tooska ah (855) 724-6809.

Sida Dib loogu Istickmaalo

Goobaha PaintCare waa aqbalaan dhammaan noocyada ranjiga guriga duugoobay, midabka iyo xabagta – xitaa haddii ay 20 sano jireen! Weelku waa inuu yahay mid qaada shan gallons ama kayar (18.93 litir), noocyo kooban oo rinji ahna lama aqbali karo. Ka fiiri dhabarka xaashida liiska waxa aad dib-u-isticmaali karto.

Dhammaan goobaha PaintCare ee lagu qubo waxay aqbalaan illaa shan galaan (18.93 litir) oo rinji ah boogashadii. Goobaha qaar ayaa aqbala ka badan. Fadlan wac goobta kahor si aad u hubiso inay aqbalaan qaddarka rinjiga aad rabto in dib loo wershadeeyo.

Hubso in dhammaan weelka rinjiga uu leeyahay dabool iyo sumado asal ah, uguna rarto si ammaan ah gaadiidkaaga. U qaad goobta dejinta xilliyada saacadaha shaqada. Waxaanu ka qaadi doonaa halkaas.

Maxaa ku Dhaca Rinjiga?

PaintCare waxay xaqiijin doontaa in rinjigaaga hadhaaga ah dib loogu qaso rinji dib loo cusboonaysiiyey, loo isticmaalo shidaal ahaan, laga sameeyo waxyaalo kale ama loo qubo si sax ah.

Ayaa Istickmaali Kara Barnaamijka?

Dadka ka keenaya rinjiga gurigooda waxay keeni karaan ilaa inta goobto ogglaato rinjiga latex am aka kusalaysan saliidda.

Ganacsiyada (qandaraaslayaasha rinjiga iyo kuwa kale) waxay isticmaali karaan barnaamijkan oo leh hal xanibaad: Haddii ganacsigaagu soosaaro ka badan 220 rodol oo udhigma 99.79 kg (illaa 20 – 30 galaan (75.71 – 113.56 litir)) oo qshin halis ah bishii, waxaad isticmaali kartaa goobaha lagu tuuro rinjigaaga latex-ka ah keliya laakiin aan-ahayn rinjiga saliidda kusalaysan. La xidhiidh PaintCare si aad wax badan uga ogaato xannibaaddan.

Qaadista Xaddiga Badan

Haddii aad haysato ugu yaraan 200 galaan (757.08 litir) oo rinji dib loo wershadaynayo gancsigaaga ama guriga, na weydii adeegga la soo qaado. Fadlan soo wac wixii faahfaahin dheeraada ama codsi ballan.

Fiiga PaintCare

PaintCare waxa maalgaliya khidmadda ay bixiyaan soosaarayaasha rinjiga ee qasaacad kasta oo rinji ah oo ay gobolka ka iibiyaan. Soosaarayaashu waxay u gudbiyaan khidmadda tafaariqlayaasha, kuwaasi oo markaa ku dara qiimaha rinjiga. Tukaanadu waxay dooran karaan inay ku muujiyaan ama ayna ku muujin khidmadda risiidhadda. Qidmada wuxuu u dhaxeeyaa \$0.35 senti ilaa \$1.99 waxayna ku kala duwanyihin balaca konteenarka iyo gobalka la joogo hadba.

\$0.35 - \$0.49:	Weelasha yar (tusaale ahaan pints & quarts)
\$0.75 - \$0.99:	Weelasha cabirka dhexe (tusaale ahaan, 1 galoon)
\$1.60 - \$1.99:	Cabirada waaweyn ee ilaa 5 galoon

Maya Deebaaji

Khidmaddu ma aha deebaaji – waxay kaqayb tahay qiimaha iibka. Khidmadda waxa loo isticmaalaa in lagu bixiyo kharashyada socodsiinta barnaamijka: dib-u-cusboonaysiinta, waxbarashada dadwaynaha, shaqaalaysiinta iyo kharashaad kale.

Nagala Soo Xidhiidh

Si aad u barto in dheeraad ah ama u hesho goobta lagu tuuro, fadlan booqo www.paintcare.org ama wac (855) 724-6809.

